(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 7

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

TIRSI/MGH/21/86 Taariikhda 11.8.86

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Axmed Jibriil Nuur, ee ku taariikheysan 21.7.86, ee uu ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeegga War. ee Lumay ee hoos ku xusan;

MARKU UARKAY: Taarka uu Bangigu Laamihiisa iyo Xisaabaha Guud u kala diray ee ku taariikheysan 29.5.86;

MARKUU ARKAY: Xaashida Lam. yahay 0772 ee ku taa riikhaysan 6.8.86, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa, ayna ku caddeeyeen in Jeeggees War. ee lumay lam. yahay 91256 ee lacagtiisuna tahay 100,000/= Shiljn, ee taariikhdiisuna tahay 25.5.86, ee laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa, loona sameeyey Axmed Jibriil Nuur;

MARKU UARKAY: In Jeeggaas War. ee lumay Lacagtiisu uu iska leeyahay Axmed Jibriil Nuur;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegga War. ee lumay ee Lam. yahay 91256, loona cusbooneysiiyo Axmed Jibriil Nuur, cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood ka haysata, muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa, in uu Nuqulka Go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysataa Jeeggaas lumay ee Wareega ee kor lagu kansal gareeyey ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

GUDDOOMIYAHA MAX. G.W/GALBEED HAR.
(Ibraahin Faarax Maxamed)

KAALIYAHA MAX. G. W/GALBEED HAR.
(Axmed Wacays Maxamed)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Saciid Xersi Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lr. 0684527 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Saciid Xersi Faarax sida ku cad warqadda lam. 854 ee Tr. 24.1.87 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Keyd ka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee Tr. 9.9.62dii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lam. 0684527 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Saciid Xersi Faarax.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad in ay siiso J.le Saciid Xersi Faarax lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000/= oo ah beddelkii Jeeg War. kor ku xusan; markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood laga biljaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka harreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.1.1987

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 9

IIB MAGALE

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريـــدة الرسميـــة

Sannadka 15aad Muqdisho, 1da Feb. 1987 Lr. 2

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 4 ee 1 Jan. 1987, Oggolaanshe Miisaaniyadda ku talo galka ee Dawladda ee Sannadka 1987. BOG. 79

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 3 ee 15 Jan. 1987 Tariifada Khidmadda Nootaayada » 80

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 4 ee 3 Jan. 1987 Laalid xil » 85

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, L. 6 ee 12.12.86, Magacaabid Guud/ye iyo Gudd/ye ku xigeen Golaha Sh. Degaanka. » 87

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEY. IYY WIXII LA MID AH

WASAARADDA H. GUUD 18.12.86, Naado Dhul J/le Shariif Nuur Sayid Rasuul L. 5 » 98

WASAARADDA H. GUUD 18.12.86, Naado Dhul J/le Axmed Xasan Cumar L. 6 » 99

WASAARADDA H. GUUD 18.12.86, Naado Dhul J/le Shariif Nuur Sayid Rasuul L. 7 » 100

WASAARADDA H. GUUD 18.12.86, Naado Dhul J/le Cabduqaadir Yaslam Saciid L. 8 » 101

WASAARADDA H. GUUD 18.12.86, Naado Dhul J/Shariif Cusmaan Mahdi L. 9 » 102

WASAARADDA H. GUUD 18.12.86, Naado Dhul /le Ibraamih Cusmaan Nuur L. 10 » 103

WASAARADDA H. GUUD 18.12.86, Naado Dhul J/le Abuukar Sheekh Amiin L. 11 » 104

WASAARADDA H. GUUD 18.12.86, Naado Dhul J/le Saaljm Yuusuf Saciid L. 12 » 105

WASAARADDA H. GUUD 18.12.86, Naado Dhul J/le Dhax'yada Cabdi Yarow Xasan L. 13 » 106

WASAARADDA H. GUUD 18.12.86, Naado Dhul J/le Maxamed Jeylaani Maxamed L. 14 » 107

WASAARADDA H. GUUD 18.12.86, Naado Dhul J/le Caasha Maxamed Nuur L. 15 » 108

WASAARADDA H. GUUD 18.12.86, Naado Dhul J/le Maxamed Jeylaani Maxamed L. 16 » 109

DAWLADDA H. MUQ. 16.12.86, Naado Dhul J/le Shirkadda Somalce Ment L. 17

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 3.187. Lumid Jeeg X/S. L. 179 L. 172414 ku saran Faaduma Cumar Maxamed L. 18 » 110

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 7.1.87, Lumid Jeeg War. L. 732638 ku qoran Axmed Cabdi Maxamed L. 19 » 111

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 14.1.87, Lumid Jeeg War. L. 0428025 ku qoran Sahra Aadan Xuseen L. 20 » 112

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 7.1.87, Lumid Jeeg War. L. 732639 ku qoran Axmed Cabdi Maxamed L. 21 » 113

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 5.1.87, Lumid Jeeg War. L. 0351539 ku qoran Cabdulqaadir Nuur Caraale L. 22 » 114

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 20.1.87, Lumid Jeeg War. L. 0225388 0225387 0225350 ku qoran Cabaas Cali Maxamed L. 23 » 115

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 2.1.87, Lumid J/War. L. 0069226-567349 ku qoran Xasan Mire Nuur L. 24 » 116

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 4.1.87 Lumid Jeeg War. L. 4876 ku qoran Maxamed Axmed Xaaji L. 25 » 117

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER, 25,9,86 Lumid 2 J/War. ku qoran Cabdul laahi Garaad L. 26 » 118

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER, 26,1,87 Lumid 3 J/War. ku qoran Axmed Ibraahim Warsame L. 27 » 119

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.9.86, Lumid 6 Jeeg War. ku qoran Cabdullaahi Jaamac Xasan L. 28 » 121

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.9.86, Lumid Jeeg War. L. 0150176 ku qoran Cabdullaahi Jaamac Xasan L. 29 » 122

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 4 taariikh 1 Jan. 1987 Oggolaashaha Miisaaniyadda ku talo galka ee Dawladda ee Sannadka 1987

MADAXWEYNAHA JD..S.

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaashaha Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Dawldda waxaa awood loo siiyey in ay soo uruuriso Dakhliga iyo in ay bixiso kharajka ku qoran Miisaaniyadda halkan ku lifaaqan ayadoo la aarcayo Xeerka, habka iyo nidaamka u degsan maamulka xisaabaadka iyo hantida Dawladda.

Qodobka 2aad

1. Isbeddelka Guud ee miisaaniyadda iyo kuwa ku saabsan madaxyada miisaaniyadda waxaa lagu soo saarayaa Sharci.

2. kala wareejinta ku saabsan madax xigeennada isku madax ah waxaa awood loo siiyey Dawladda.

3. Kala wareejinta ku saabsan xarfaha hoos yimaada madax-xige walba, waxaa awood loo siiyey Wasiirka Wasaard walba. kala wareejinta caykan oo kale ee miisaaniyadda Dawladda Hoose waxaa awood loo siiyey Guddoomiyaha Maamulka Dawladda ee Gobol walba.

Qodobka 3aad

1. Miisaaniyadda loogu talo galay Mashruucyada Horumarineed iyo fulinta qorshaha Qaranka waxaa loogu isticmaali karaa oo kaliya mashruuc horumarineed.

2. Wasiirka Maaliyaddu wuxuu awood u leeyahay inuu keyd ka dhigo, haddii loo baahdo, dhammaan ama qayb ka mid ah lacagta ku jirta madax-xige walba ee miisaaniyadda isagoo aarcaya Sharciga.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Jennaayo 1987, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J/adda Muqdisho, 1 Jan. 1987.

QAYBTA LABAAD
XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 3 ee 15 Jan. 1987 Tariifa da Khidmada Nootaayada.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobkiisa 82 (14) iyo 111 (2).

ISAGOO ARKAY: Qodobka 69aad ee Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Nootaayada ee Lr. 8 ee 15.2.61 iyo Lr. 1 ee 2.3.1962.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Mihnada Nootaayada ee Lr. 7 ee 2.2.1986 qodobkiisa 4aad.

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyay Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda.

Qodobka 1aad

Khidmadda ay xaq u leeyihiin Nootaayayaasha hawlaha ay qabanayaan, waxay u kala baxayaan,

1) Khidmo Go'aan ee qoraallada aan la qiimeyn karin.
2.) Khidmo ku dheeli tiran qoraalada qiimaysan.
3.) Khidmada Saacadaha (dheeraadka ah).
4.) Khidmadaha Nuqullada, Shahaadooyinka, soo koobidda, ku qoristа iyo ka minguuridda Diiwaanka Reboortooriyada.
5.) iyo Khidmadaha kale uu Sharcigu oggolaado.

Qodobka 2aad

KHIDMADAHA

Khidmadda go'an waxay u kala baxdaa sida soo Socota:

b) Wakaalad Guud Sh.So. 200
t) Wakaalad Gaar ahaaneed Sh.So. 180
j) Keydinta qoraalada iyo Dekumentiga Sh.So. 150
x) Keydinta dardaaran qarsoodi ah Sh.So. 140
kh) Keydin dardaaran Gacan ku qoran Sh.So.130
d) Qoraalada kale ee aan lagu xusin Xeerka Sh.So. 100

Qodobka 3aad

KHIDMADA KU DHEELI TIRAN QODOBADA QIIMEYSAN

Qoraal kasta oo ku saabsan kambiyaale dhacay caba

ilaa	Shs.	100			Shs. 10/=
laga bilaabo	»	100	ilaa	1.000	» 20/=
» »	»	1.000	ilaa	5.000	» 30/=
» »	»	5.000	ilaa	10.000	» 40/=
» »	»	10.000	ilaa	20.000	» 60/=
» »	»	20.000	ilaa	50.000	» 100/=
» »	»	50.000	ilaa	100.000	» 120/=
» »	»	100.000	ilaa	500.000	» 150/=
» »	»	500.000	ilaa	1.000.000	» 200/=
» »	»	1.000.000	iyo wixii ka dambeeya		250/=

Dhigaal (Deposito) ka kooban lacag caddaan ah iyo han tida kale ee qiimaha leh wuxuu Noohaayuhu ku yeelanaa khidmad dhan kunkiiba laba.

Qodobka 4aad

Qoraallada iyo heshiisyada ku saabsan kala wareegidda hanti ma-guurto, qiimaha hantida heshiisyada Shirkadeed oo cayn kasta ah iyo wada lahaansho hantiyeed, qiimaha hantida lagu shirkoobayo ama la wada yeelanayo; isku darid, qiimaha guud ee hantida iyo keydka Shirkadaha la isku darayo, haddii Shirkadaha la isku darayo middoodii ay midda kale la mdidoobeyso kana noqoneyso; hantida iyo keydka guud ee Shirkadda oo midda kale la midoobeyso; qoraalada shirarka shirkadaha ku saabsan hanti kordhin ama soo saarid qiraalo deyn Shirkadeed (Obbligazione), qiimaha hantidii hore lagu soo kordhinayo, ama qiimaha guud ee qoraaladda ku saabsan hanti kala qaybsasho; qiimaha guud ee hantida la qaybsanayo; qoraalada ku saabsan xuquuq ama hanti is dhaafin ama isugu bedelid (transazione), qoraallada ku saabsan dhisid xuquuq la xiriira intifaaca, isticmaalidda iyo mididiinnimo, dhuleed (servitu prediali); raxan, alaab isku bedelid (permuta); xaraash Maxkamadeed, enfiteeusi, iyo qoraallada kale ee ku saabsan xuquuqda ee lahaanshaha (diritti possessori) ama dhammaanad, waxaa looga qaadayaa khidmadaha soo socda:

b) Qiimo ilaa	10.000	————	2%
t) 10.001	ilaa 25.000	————	1%
j) 25.001	ilaa 50.000	————	0.50%
x) 50.001	ilaa 100.000	————	0.30%
kh) 100.001	ilaa 500.000	————	0.15%
d) 500.001	ilaa 1.000.000	————	0.05%
r) 1.000.000	ilaa wixii ka badan	————	0.03%

Qodobka 5aad

Khidmada boqolayda ah ee ku xusan Qodobka 4aad waxaa laga dhigayaa nus marka Noohaayuhu uu qabto hawlaha soo socda:

b) Kala wareejinta hantida guurtada ah iyo hantida kale oo guurtada ah ee diiwaan gashan;

hanka iyo kirada xamuulka guud ahaan;

j) Qoraallada ku saabsan iskaashatooyinka guud ahaan.

Qodobka 6aad

Khidmadda laga qaadayo qoraallada ku saabsan isdnaaf-siga hantida guurta iyo maguurtada waxaa loo raacayaa khidmadooda midda qiimo badan.

Kala wareejinta ay ku wada jiraan hanti ma-guurto iyo guurto ah waxaa loo raacayaa khidmadda mid kasta u gaarka ah.

Qodobka 7aad

Arrimaha aan lagu xusin qodobbada kor ku tilmaaman, khidmadda laga qaadayo waxaa looga qiyaas qaadanayaa kuwa ay isku midka yihiin (casi simili).

Qodobka 8aad

KHIDMADDA SAACADAHA DHEERAADKA

Qoraallada ku saabsan liiska tirakoobka xisaabaadka (inventario) iyo qaybinta hantida, iibka Maxkamadaha (vende giudizarie) furitaanka iyo faafinta dardaaranka sirta ah, waxaa laga qaadayaa khidmo dhan Sh.So. 120 labada saacadood ee hore iyo Sh.So. 50/= saacad waliba ee dambe, hase yeeshee marna kama badnaan karto Sh.So. 300/= maalintiiba.

Qodobka 9aad

KHIDMADDA NUQULADA IYO SHAHAADOOYINKA

Bixinta nuqullada iyo shahaadooyinka nootaayada waxaa laga qaadayaa khidmad go'an oo ah Sh.So. 20/=.

Wixii ka baxsan qoraallada ku xusan qodobbada kor ku tilmaaman waxaa laga qaadayaa khidmadda hoos ku qoran:

b) Kambiyaale dhacay oo laga soo dacwooday — Sh.So. 5/=;

t) Qoraallada kale: So.Sh. 20/= boggiiba.

Qodobka 10aad

Nootaayaha wuxuu xaq u leeyahay in loo celiyo kharaka galaynta, ku muujinta diiwaanka Rebortooriyada ee qoraallada uu isagu sameeyey, sida soo socota:

Qodobka 11aad

Nootaayayaashii horay ugu shaqaynayay Dowladda ee Madax-bannaanaaday 1dii Abriilie 1986 waxay xaq u leeyihiin laga bilaabo 1.4.1986 laa 31.12.1986 in dib loogu celiyo kharajkii adeegga ee ay ku lumiyeen hawlaha Nootaayada iyo 3% ee dakhligii ay soo xareeyeen.-

Qodobka 12aad

Waxaa ka reeban Nootaayaha inuu qaato khidmad ka baxsan taa ku qoran Xeerkan.

Qodobka 13aad

Waxaa la tir-tiray Sharciyada iyo Xeerarka hoos ku qoran iyo wixii Sharci ah oo soo horjeeda ama aan la socon karin Xeerkan:

1 Xeerka Lr. 99 ee 3.04.1972
2. Xeerka Lr. 42 ee 16.05.1981
3. Xeerka Lr. 8 ee 25.12.1972
4. Xeerka Lr. 16 ee 2.07.1972.

Qodobka 14aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa laga bilaabo 1.1.1987, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowlad-da.-

Muqdisho, 15 Jan. 1987

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS lambar 4, taariikh 3 Jan. 1987: Laalid xil.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKU UARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Xeerka Tashriiciga (Decreto legislativo) lambar 2 ee 31ka Maarso 1964, kuna saabsan Nidaamka Garsoorka Maxkamadaha Ciidammada;

MARKUU TIXGELIYEY: Xiika loo magacaabay G/Sare CUSMAAN MAYE MACALLIM in uusan la socon karin jagada uu hadda hayo ee Guddoomiyennimada Maxkamadda Sare ee Ciidammada Qalabka Sida;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa si ku meel gaar ah looga laalay Gaashaanle Sare Dr. Cusmaan Maye Macallim xilka Guddoomiyenimada Maxkamadda Sare ee Ciidammada Qalabka Sida.

Qod. 2aad

Xilka Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee CQS waxaa sii qabanaya Lataliyaha ugu «senior» san ee isla Maxkamadda.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 3 Jan. 1987

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 6 ee 12.12.86 Magacaabid Guddoomiye iyo Guddoomiye ku xigeen Golaha Shacbiga Degaanka.

WASIIRKA WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

MARKUU ARKAY: Qodobka 94aad ee Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad ee Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 13aad ee Sharciga Lr. 6 ee 12.2.1986 Xubintiisa 4aad;

MARKUU HELAY: Warqad Lr. JDS/XM/AXD/N= 1712 ee 2.12.86;

MARKUU HELAY: Talada Guddiga Fulinta ee Gobolka W/Galbeed.

WUXUU SOO SAARAY XEERKA SOO SOCDA:-

Qodobka 1aad

J/le Xaashi Muuse Xuseen Guddoomiyaha Golaha Sh/-Degaanka Degmada Hargeysa, J/le Biixi Axmed Rooble Guddoomiye Ku Xigeenka Golaha Shacbiga Degaanka Degmada Hargeysa, waxaa laga qaaday xilkii guddoomiyanimada iyo ku xigeenka, waxayna baaqi ku ahaanayaan xubinimada G/Sh/Degaanka Degmada Hargeysa.

Qodobka 2aad

Ka dib markii aan helay xulka Xoghayaha Guud ee XHKS, waxaa buuxinayo Jagooyinkii laga qaaday Jaallayaashaasi Xubnaha hoos ku magacaaban. 1:- J/le IBRAAHIM SHEEKH C/RAXMAAN — GUDDOOMIYE;

2:- J/le CABDI CABDULLAHI MOOGE — KU XIGEEN.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waana in lagu soo saaraa Faafint aRasmiga ah ee Dawladda.

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 68
Muqdisho, 14 Dec. 1986
Hantidhawraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali
Muqdisho, 14 Dec. 1986

WASIIRKA WASAARADDA ARRI. GUDAHA

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA L. 7 ee 21 Jan, 1987, Xeer Samafal.

WASIIRKA WAG

ISAGOO ARKAY: Xaashiidii 1aad tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaankii 21kii Oktoobar ee 1969kii;

ISAGOO ARKAY: Sharci Lamb. 37, ee Xeerka Madaniga soo na baxay 2.6.1973kii kuna saabsan Hay'ad Samafal oo Waddani ah;

ISAGOO ARKAY: Arji uu keenay Asaasaha Hay'adda Samafalka J.le Axmed Cumar Xasan kaasoo weydiistay Dhismo Hay'ad Samafal waxaana loogu oggolaaday Warqadda Summadeedu tahay CG/1/4-1367-86, ee Taariikhdeedu tahay 14.7.1986dii lagana Diiwaangeliyey Maxkamadda Gobolka Banaadir;

ISAGOO ARKAY: Xeerka ama Nidaamka Hay'adda loogu magacdaray P;HD;

ISAGOO ARKAY: Magacyada Guddiga Agaasinka.

Wuxuu oggolaaday in la Diiwaan geliyo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho, 21.1.1987

WASIIRKA WASAARADDA ARRI. GUDAHA J.D.S.

(J le Axmed Suleymaan Cabdalla)

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

XAFIISKA KAALINTA

UJEEDDO:- Qoraal Haayn (Nota Deposito).

Aniga, Notaayo Dr. MAXAMUUD XUSEEN DIIRSHE waxaan u soo dirayaa Xafiiskaan Kaalinta ee Maxkamadda Gobolka Benaadir — Xamar — qoraalka lambarkiisu yahay Rep. N. 35448, ee 18.1.87, oo isla aniga Notaayo aan sugay, Xamar laga canshuuray taariikh, 19.1.87, Lb. 4 Vol, 24, kuna saabsan URUR SAMAFAL AH OO WADDANI AH, ee la magac baxay PHD, oo Saldhiggiisu yahay Hargeysa, kuna sii tilmaaman qoraalka halkaan hoose ku lifaaqan; Sidaas darteed, waxaan codsanayaa in qoraalkaas la haaoy, lana geliyo Buugga Maxkamadda; Kaasoo laga ansixiyey isla Maxkamadda Gobolka Xamar — taariikh, ...

Muqdisho, 19.1.1987

PHD — GUUD AHAAN.

Participating home Development (PHD), waa hay'ad samafal ah oo Soomaaliyeed oo leh ujeedooyinka ah mid aan diini ahayn mid aan siyaasi ahayn iyo mid aan macaash sameyn, qaab dawlo ma aha, waxay daneysaa daryeel dadweyne, dakhliga waxay ka heleysaa lahaanshaha gaar ahaaneed, hay'adaha caalamiga ah, waxtar samafal ahna ha noqdo mid waqti shaqaale, mid dadban ay ka hesho guud ahaan dadweyne. PHD qaabkeeda horumarku wuxuu ku dhisan yahay halheys hiddo iyo dhaqan Soomaali ah, wax ku darso dibeed horumar hel.

Waxaanu ku dejisan yahay Sharciga Soomaaliyeed, waxqabadkeeduna wuxuu ka bilaabmayaa Soomaaliya, marka ay khibrad yeelato hay'adani waxay ka hingelineysaa shaqooyinka ama gaarsiineysaa Wadamada soo koraya.

PHD waxay leedahay shuruucdeeda iyo qodobadeeda gaar ahaaneed, oo leh hor-dhig kala ah:- Ujeeddooyin, Himilooyin iyo Qaab nidaameed. Himilooyinka iyo fulinta arrimaha waxay ku gaareysaa go'aan guddi agaasimeyaal. Dadka ka faa'iideysan doono PHD dhaqdhaqaaqeeda waxaa ka mid ah:- Dadka Naafada ah, Qaxootiga, Reer Guuraaga, Haweenka iyo Dadweyne guud ahaan.

UJEEDDOOYINKA PHD

1. Inay guubaabiso dhaqdhaqaaq samafal ah ha noqdo mid lacageed iyo mid nooc kale ah oo ka keento lahaansho gaar ahaaneed iyo dadweyne.

2. Inay kordhiso falsafad ah askaa wax u qabso, oo dhalisa inay dadku wax qabsadaan daneeyaana hawsha daryeelkeeda iyo socodsiinteedaba.

3. In loo abuuro shaqo dadka saboolka ah ee aan shaqo haysanin.

4. In la abuuro Agoonyahano Soomaaliyeed xagga horumarka oo awood u yeesha fulinta horumar cusub.

5. In la abuuro lana taageero awooda Iskaashatooyinka Ururada Soomaaliyeed oo horumar ah, si loo xaqiijiyo inay sameystaan jaangooyo dadweynahana ku hanuuniyaan suura gelinta iyo maamulka mashaariicda horumarinta dalka.

6. Inay kor u qaadaan xaalada nolosha dadweynaha, Qaxootiga ha noqdaan R/Magaal iyo Miyiba.

8. In la abuuro Ganacsi yar yar ee cusub, lana caawiyo kuwii hore u jirey.

9. In la dhiiri geliyo Beeraleyda oo loo sameeyo, suuq Darsi dhoofin dibadeed iwm.

10. In kor loo qaado Xirfada shaqaalaha, iyadoo la siinaayo Tababar dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba.

11. In kor loo qaado xiriirka Ganacsiga iyo kan Horumarinta ee Caalamiga ah.

12. In loo sameeyo xidhiidh iyo aqoon isweydaarsi dhexiyadoo loo sameynaayo meel dhexaad wax lagu ururiyo.

13. Si aan u horeymarino, awoodayada xagga maamulka iyo xisaabaadka oo ula dhigmi karta tan Hay'adaha samafalka Caalamiga ah, iskaashi waanu la sameysan karaan Hay'adaha Shisheeye ee khibrada leh, oo noqon doonto in la siiyo Qandaraasyo ama iwm.

14. Mashaariicda Horumarka ah eenu faraha la geleyno waxay noqon doonaan, qaar dadweynuhu u baahan yahay sheegteena, lana arki karo, lagana qeybgalo, faa'iidadooduna si sinnaan ah u qeybsantey.

15. In la siiyo Haweenka iyo Ururada Haweenka fursado ay kaga qeyb qaataan Mashaariicda.

16. In lagu fidiyo Hay'adaha Samafalka oo qayb laxaad leh ka qaataan sidii loola caawin lahaa Dawladda J.D.S. in Horumar la gaadho ku fidsan Soomaaliya.

17. In loo qabto hawsha iyadoo laysku xidhayo Dawladaha Hoose, Deegaanada, Goboladda, iyo Mas'uuliyiinta Qarannka, marka jaangooyada la sameynayo iyo fulinta hawlaha.

SHURUUCDA GUDDIGA AGAASINKA PHD.

1. Guddiga Agaasinka waxay ka kooban yihiin, Rag ama Dumar, waxayna yihiin, Guddoomiye, Hantidhowre, Shan oo caadi ah.

2. Xubnaha Guddiga Agaasinka waxaa magacaabi doona aasaasaha Hay'adda, marka la sharciyeeyo.

3. Guddoomiyaha waxaa dooran doona Xubnaha Guddiga Agaasinka.

4. Shirka caadiga ah ee Guddiga Agaasinka waxa laysugu imaanayaa hal jeer Sannadkiiba, qabashada fadhi aan

5. Xubin kasta ee Guddiga waxay leedahay hal cod Xubin, go'aankana waxaa lagu gaarayaa aqlibiyad sahan.

Haddiise codadka oggolaanshaha iyo kuwa diidmadu ay isla ekaadaan waxa dhaqan galaya cod bixinta uu raaco Gud doomiyuhu.

6. Xubnuhu ma leh wax gunno ah ee lacageed iyo Xaquuq kaloo ah intaa ay fuliyaan hawsha Guddiga.

7. Haqal qoraalka Shirarka Guddiga agaasinka wuxuu noqonayaa afka Soomaaliga ama Ingiriisi.

8. Si loo dhowro himilooyinka iyo Ujeeddooyinka PHD, Guddiga Agaasinka waa in ay sameeyaan Qodobo Maareeyaha oo ka madax ah hawl fulinta maalmeedak ee Mashaariicda PHD, iyagoo hubsanaya waafajinta iyo fulinteeda.

9. Guddiga Agaasinku waxay dooranayaan Maareeyaha Guud Muddo 2 (Labo) Sano ah. Waaney bedeli karaan muddadaas gudeheeda iyagoo sabab u haya.

10. Hanti dhowruhu waa in uu baadhis dhan ku sameeyaa xisaab sannadeedka PHD iyo markii kalaba oo ay ku amraan Guddiga Agaasinku.

11. Hanti dhowru waa in uu ahaadaa qof khibrad gaar ahaaneed leh, waa in aanu noqon Shaqaale ama la taliye.

12. Iyadoo la raacayo warbixinta Hanti dhowraha, Guddida Agaasinku waa in ay sameeyaan Xisaabta Sannadka, iyo in ay Ansixiyaan Xisaabtii Sannadkii hore.

SHURUUDAHA KA MID NOQOSHADA XUBNAHA GUDDIGA AGAASINKA EE PHD.

Hanti dhowruhu waa in uu yahay qof Xisaabaadka Xirfad u leh, yaqaanana Hantidhowr-nimada.

Xubnaha kale ee Guddiga Agaasinka waxaa laga rabaa Shuruudahan:-

1. Xubin ka mid ah dad ee looga qadariyo shacbiga.

2. Dhalasha kasta waa ka mid noqon karaa xubin, hase ahaatee waa in ay u bataan ciddii leh dhalasho Soomaaliyeed.

3. Xubnaha oo idil waa in ay noqdaan dad aqoonsan, taageera Dimuqraadiyada, xurada furan, sinnaanta rag iyo Dumarka Caddaaladda iyo sadaqada.

4. Xubnuhu waa in ay aqoonsan yihiin Horukac loo baa-

5. Xubnuhu waa in ay khibrad hore u leeyihiin xidhiidh iyo wax qabad dadweyne.

MAAMULKA PHD.

PHD waxay yeelan doonaa Maareeye Guud oo ka wakil an Guddiga Agaasinka. Xagga hawl fulinta iyo maamulka hay'adan isagoo u yeelan doona awood buuxda kana mas'uul an, Qiimaha hwasho ku kacdey, iyo fulinta ujeeddooyinka hay'adan isagoo tixraacaya dhinaalnaha Guddiga Agaasinka, dhinaalnaha iyo shuruucdaanaha waxaa saameyn doona Guddiga Agaasinka, fulintana Maareeyaha ayaa ka mas'uul an oo ay ku jiraan:-

— Maamulka Guud.
— Ururinta kharash iyo Tabarucaha.
— Doorashada Mashaariicda.
— Fulinta Mashaariicda.
— Bixinta Qandaraasyada iyo Maamulkooda.
— Miisaaniyadda, sannad xisaabeedka iyo Xisaabaha kale.
— Qaab-nidaamka shaqo qorista, xuquuqda horumarista iwm.

PHD HAWSHEEDA

1. Nabaad Guurka, oo wax laga qabto.
2. Biyaha oo wax laga qabto.
3. Sameynta iyo Daryeelka Wadooyinka.
4. Adeegista Magaalooyinka.
5. Ilaalinta Biyo Mareenada.
6. Tababarka.
7. Abuurka Dakhliga.
8. Dariiqooyinka kale oo wax lagu horumariyo waxa la shito.
9. Meheradaha lahaanshaha gaar ahaaneed oo hore loo mariyo.
10. Horumarin Beeraha iyo Xoolaha Nool.
11. Suuqinta iyo Ganacsade Horudhigooda.

PHD XISAABEEDKA

1 Dhammaan amarada la siinayo Xisaabiyaha ama la-

3. Waa in qaansheegto la oggolaado la helo intaan cidi. na wax laga iibsan;

4. Waa in la diiwaan geliyaa wax alaaliyo wixii aan la isticmaalin ee aabooyin ah;

5. Waa in xisaab kala duwan loo sameeyaa, iyo xisaab baaqiyeed kala duwan wixii lacag soo baxda ee meel ka socoto.

6. Lacagtaas kala duwan oo mid kaash loo sameeyo petty cash gaar ahaaneed, oo lacagta caddaanka lagaga soo saaro Jeeg kolba xisaabta ay ku habboontahay.

7. Waa in la helo xisaabta warbixinta ka socota Bangiga, dibadeed baahdo Maareeyuhu oo qof u xilsaaro aan ahayn Xisaabiyaha Caadiga ah.

8. Waa in Miisaaniyad loo sameeyo xisaab sannadeedka eey oggolaadaan Guddiga Agaasinku.

9. Kharash celinta Miisaaniyad kasta iyo dhaqdhaqaaqa Mashruuca warbixin waa in laga bixiyaa Saddexdii biloodba mar (Rubaaci).

10. Waa in hab loo dejiyaa Horumariska iana dhowro, qandaraasle lama siin karo horumaris kuu u baahan yahay laba Toddobaad wax ka badan, waana laga joojinayaa haddaan la soo celin Rasiidadii horumariska ee la bixiyey labadii toddobaad ee hore.

Qodobadaas kor ku xusan wixii lagu biirinayo ama laga dhimayo waxaa sameyn kara Guddiga Agaasinka.

Ururkan waxaa lagu fasaxay Warqadda Wasiirka Arrimaha Gudaha Summadeedu tahay GG/1/4-1867-86, ee taar. 14.7.86, iyo tan Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta GX/1/14-1112, ee taar. 19.7.86.

Waxaa Asaasey Ururkan Jaallaha AXMED CUMAR XASAN GUULEED.

1. JAALLE AXMED CUMAR XASAN GUULEED. ——— XAFFIISKA NOOTAYAHA XAMAR

Rep. N. 35448 Saxiix la sugay

Saxiixan kore waa kii dhabta ahaa AXMED CUMAR XASAN, Soomaali ah, ku dhashay Hargeysa 1955, haddana deggan Xamar (W. Aq. N. 15339) Hargeysa, oo aniga Notaayo aqoonsaday.

Muqdisho, 18.1.87

PHD — GENERAL

Participating Home Development (phd) is an (PVD) with objectives which are non-religious, non-political and not for profit. It is non-governmental, and public service oriented, receiving revenue from the private sector, international agencies, and voluntary contributions of funds, staff time and in-kind contributions from the general public.

PHD's policy of development is based on the cultural adage, «contribute, then develop». PHD has been organized under Somali law, and initially will conduct operations in Somalia. After gaining experience, it is intrnded to expand operations to othrt developing countries.

PHD has established its own by-laws which outline its objectives, purposes and management procedures. Purposes and priorities are to be further defined, based on decisions of its Board of Directors.

Groups which will benefit from PHD activities include disabled persons refugees, rural poor, women and the elderly.

PHD — OBJECTIV7S & PURPOSES

1) To mobilize voluntary action, cash and in-kind contributions from the private sector and communities.

2) To promote a self-help philosophy, development a strong sense of owner ship and concern for continued operation and maintentenance of facilities.

3) To generate employment for the unemployed poor.

4) To establish, a cadre of Somali development professionals, capable of understanding and implementing grass roots development.

5) To establish, support and develop the capacity of Somali NGO's enabling them to define their goals and priorities, infuence community decisions, and implement and manage local development projects.

6) To establish and support new income generating mechanisma, and to develop existing mechanisma.

7) To improve the quality of life of the indigenous people and refugees in cities and rural areas.

8) To establish and support new enterprises, and to de-

market surveys, export arragements and the like.

10) To upgrade the skills of indigenous workers and professionals, through on-the-job and other forms of training, both inside Somali and abroad.

11) To promote international trade relations and international cooperation in the area of development.

12) To provide liason and promote an exchange of information between local government and international donors, through the establishment and maintenance of a data base and information center.

13) To develop qualifications in management and accounting comparable to those of an international PVO, through cooperation with more experienced development first in joint ventures, subcontracts and the like.

14) To engage in development projects that fill a need which has been expressed by people, are highly visible, are participatory and whose benefits are equitably distributed.

15) To offer women and womens groups full opportunity to actively participate in all projects.

16) To expand the role of PVOs in assisting the Government of the Somali Democratic Republic in development throughout Somalia.

17) To work closely with local, district, regional and national authorities in planning and implementing development projects.

PH D— RULES OF BOARD OF DIRECTORS

1) The Board of Directors shall be composed of men or women, and shall include a Chairperson, Auditor and five regular members.

2) Members of the Board of Directors will be nominted by the founder of PHD after the organization is registered with the Somali Democratic Republic.

3) The Chairperson shall be elected by the members of the Board.

4) Regular meetings of the Board shall be held one time per year. Extraordinary meetings may be called by called by any member of the board at any time.

5) Decisions shall be made by majority vote of the Board

event of a tied vote, the Chairperson's vote shall prevail.

6) No member of the Board will receive monetary or other compensation for duty performed on the Board.

7) Minutes of all Board meetings and decisions shall be written in the Somali language or english.

8) In keeping with the purposes and opjectives of PHD, the Board shall establish policy for the guidance of the Executive Director, who shall be responsible for the day to day operation of PHD. The Board shall monitor compliance with its policies.

9) The Board shall elect the Executive Director for two year perioda, and shall have authority to reomove him or her at any time for cause.

10) The Auditor shall perform a complete audit of PHD account at the end of each fiscal year, or more often, as directed the Auditor shall be a certified accountant, and shall not be an emloyee or consultant of PHD.

11) Upon the recommendation of the Auditor, the Board shall establish an operating budget for each fiscal year, and shall approve completed riscal year accounts.

PHD — BOARD OF DIRECTORS MEMBERSHIP

The Auditor shall be a certified accountant who has performed major audits, and who is not an employee or consultant of PHD. Eligibility rules for other members are as follows.

1) Each member shall be a well respected member of the public.

2) Citizens of any country are eligible for membership, however a makority shall be citizens of the Somali Democratic Republic.

3) All members shall be recognised for their active support of democraticy liberalism, equality of sex, justice and charity.

4) All members shall recognize the need for development and shall be prepared to give freely of their time when needed.

5) All members must have previous experience in public activities and public relations.

to the Board Daractors for day to day management of the organization. He or she shall be responsiple for cost effective operation of PHD and shali of its projects, continuosly endeavoring to fulfil the objectives and purposes of PHD, under the policy guidance of the Board of Directors.

Policies which shall be established by the Board and implemented by the Board and implemented by the Executive Director include the following:-

— General management.
— Fund raising and contributions.
— Project implementation.
— Project selection.
— Contract award and administration.
— Budget, fiscal and accounting.
— Personnel policies for recruitment, compensation, fringe benefits, and advancement.

PHD — FIELD ACTIVITIES

1) Frosion control.
2) Water resource development.
3) Improvement and maintenance of roads.
4) Municipal services.
5) Drainage protection.
6) Training.
7) Income generation.
8) Alternative energy development.
9) Private enterprise development .
10) Agricultural development (incl livestock).
11) Marketing and trade development.

PHD — ACCOUNTING

1) All instructions to the accountant or cashier must be in writing.

2) Loaning of PHD funds to any individual or organization is not allowed.

3) An approved purchase order is required before payment.

4) Complate inventories of all non-expendable properly must be maintained.

6) A petty cash fund shall be established and maintained for each funding source, if required. Cash can be replenished only by checks written on the appropriate bank account.

7) Monthly reconciliations between each account and its bank statement must be performed by the Executive Director or designated person, other than the regular accountant.

8) A budget shall be established for each fiscal year of operations, and approved by the Board of Directors.

9) Expenditures for each budget line and project activity are to be accumulated and reported quartely.

10) A system of cash advances to contracts shall be established and maintaind. No contractor will be advanced more than needed for two weeks operations. Advances will be suspended whenever receipts supporting the advances are not submitted within a two week peroid.

Amendments of Bylaws and Constitiution of this organisation could be made the Board of Directers;

This organisation was approved by the Minister of Interior Ref GG/1/4-1867-86 Date 14.7.86, and the approval of Ministery of Justice Ref no GX/1/14-1112 Date 19.7.86:

Founder of this organisation Mr. Ahmed Omer Hassan Guuleed:

1) AXMED OMER HASSAN GUULEED. ————————

OFFICE OF THE POBLIC NOTARY

Rep. N. 35448 AUTHENTICATION OF SIGNATURE

The above Signature is the true one of Mr. AHMED OMER HASSAN, neone by notary.

MOGADISHU, 18.1.1987.- THE NOTARY

(Dr. Mohamud Hussein Dirshe)

QEYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GURIYENTA
GOBOLKA SH. HOOSE SHALAMBOOD
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Shariif Nuur Sayid Rasuul uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu tahay 10.11.86 gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Deg. Marka Qaabkiisuna yahay Poligono Irgogolare Addimihiisuna yihiin 17,20. m. 14,60.m. 7,00 m, 2. m 9.70 kuna fadhiya 224,00 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Guri ku dheggan

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Sh. Hoose waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) sodon maalmood oo laga bilaabo maalinta la soo daabaco buuga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo ogeysiisyada Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalambood, 18.12.1986.

AGAASIMAHA WAAXDA SAHAMKA DEG. MAG.
Saciid Xirsi Nuux

L. 5

WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GURIYENTA GOBOLKA SH. HOOSE SHALAMBOOD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Axmed Xasan Cumar uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu tahay 8.11.86, Ga bal dhul dawladeed ah oo ku yaal De.g. Marka qaabkiisu na yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin m14,80,14, 80,10,70,10,70. kuna fadhiya 15836: MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Sh. Hoose waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) sodon maalmood oo laga bilaabo maalinta la soo daabaco buuga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo ogeysiisyada Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalambood, 18.12.1986.

AGAASIMAHA WAAXDA SAHAMKA DEG. MAG.

Saciid Xirsi Nuux

L. 6

WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GURIYENTA
GOBOLKA SH. HOOSE SHALAMBOOD
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Shariif Nuur Sayid Rasuul uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu tahay 10.11.86, gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Deg. Marka Qaabkiisuna yahay Laba Geesle Rettangolare Addimihii suna m16,m,16.4.m.4. kuna fadhiya 64,00 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Wado loo maro K. Hilibka

Galbeed Waxaa ka xiga: Waxay isku dheg/iin K. H.

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Sh. Hoose waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) sodon maalmood oo laga bilaabo maalinta la soo daabaco buuga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo ogeysiisyada Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalambood, 18.12.1986.

AGAASIMAHA WAAXDA SAHAMKA DEG. MAG.
Saciid Xirsi Nuux

L. 7

WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GURIYENTA
GOBOLKA SH. HOOSE SHALAMBOOD
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le C/Qaadir Yaslam Sa ciid uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu tahay 12.10.86 gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Deg. Marka Qaabkii suna yahay Protocolo Addimahiisuna yihiin 16.16.14.14. kuna fadhiya 224.00 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Warooyi Waxaa ka xiga: Guri ku dheggan.

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Sh. Hoose waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) sodon maalmood oo laga bilaabo maalinta la soo daabaco buuga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo ogeysiisyada Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalambood, 18.12.1986.

AGAASIMAHA WAAXDA SAHAMKA DEG. MAG.
Saciid Xirsi Nuux

L. 8

WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GURIYENTA
GOBOLKA SH. HOOSE SHALAMBOOD
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Shariif Cusmaan Mahdi uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu tahay 28.11.86 gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Deg. Marka Qaabkii suna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin m.4.4.m. 10.m.10. kuna fadhiya 40.00 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Derbi ku dheggan

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

Bari Waxaa ka xiga: Bakhaarka D/H. ee D. Marka

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Sh. Hoose waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) sodon maalmood oo laga bilaabo maalinta la soo daabaco buuga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo ogeysiisyada Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalambood, 18.12.1986.

AGAASIMAHA WAAXDA SAHAMKA DEG. MAG.
Saciid Xirsi Nuux

L. 9

WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GURIYEYNTA GOBOLKA SH. HOOSE SHALAMBOOD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Ibraahim Cusmaan Nuur uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu tahay 15,10,86 gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Deg. Shala mbood qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin m.20.20.m.60,m.60, kuna fadhiya 1200,00 MDH,

SOOHDIMI.HIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Wayooyi Waxaa ka xiga: Dhul Banaan

Koonfur Waxaa ka xiga: W. Shalaambood X. aaddo.

Galbeed Waxaa ka xiga: Abuukar Sheekh Amiin

B a r i Waxaa ka xiga: Abuukar Sheekh Amiin

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H/Guud Gobolka Shabeelaha Hoose, waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) sodon maalmood oo laga bilaabo maalinta la daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo ogeysiisyada Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA DEG MAG.

Saciid Xirsi Nuux

L. 10

WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GURIYEYNTA GOBOLKA SH. HOOSE SHALAMBOOD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Abuukar Sheekh Amiin uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu tahay 15.10.86, Ga bal dhul dawladeed ah oo ku yaal Deg. Shalambood Qaab kiisuna yahay Rettangore Addimihiisuna yihiin m.20,20, m.60,60. kuna fadhiya 1200,00. MDH.

SOOHDIMI HIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Banaan

Koonfur Waxaa ka xiga: W. Shalambod X. Aaddo.

Galbeed Waxaa ka xiga: Ibraahim Cusmaan Nuur

B a r i Waxaa ka xiga: Xaaji Xuseen Macallim.

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H/Guud Gobolka Shabeelaha Hoose, waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) sodon maalmood oo laga bilaabo maalinta la daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo ogeysiisyada Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalambood, 18.12.1986.

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA DEG MAG.

Saciid Xirsi Nuux

L. 11

WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GURIYEYNTA
GOBOLKA SH. HOOSE SHALAMBOOD
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Saalim Yusur Saciid uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu tahay 12.10.86, Ga bal dhul dawladeed ah oo ku yaal Deg. Marka Qaabkiisu na yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 13,60x7,10 kuna fadhiya 96,56. MDH.

SOOHDIMI HIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Guri

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H/Guud Gobolka Shabeelaha Hoose, waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) sodon maalmood oo laga bilaabo maalinta la daabaco buugga Waaxda Farsamada Dhulka.

Laguna soo dhejiyo ogeysiisyada Dawladda Hoose Faafinta Rasmiga ah.

Shalambood, 18.12.1986.

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA DEG MAG.
Saciid Xirsi Nuux

L. 12

WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GURIYEYNTA GOBOLKA SH. HOOSE SHALAMBOOD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Dhaxaltooyada Cabdi Yarow Xasan uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu ta hay 1.12.86, gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Deg Bee sha Jannaale Qaabkiisuna yahay Elle Addimihiisuna yi hiin 42,35,1,40. 44.44.79. kuna fadhiya mq,3.427,00.

SOOHDIMI.HIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: W. Weyn oo aaddo S/Cus.

Koonfur Waxaa ka xiga: Saldhigga Boo. & Cariishyo

Galbeed Waxaa ka xiga: W. oo ka timaado Laamiga

B a r i Waxaa ka xiga: G.H.D. Ee Beesha Janale.

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H/Guud Gobolka Shabeelaha Hoo se, waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) sodon maalmood oo laga bilaabo maalinta la daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo ogeysiisyada Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalambood, 18.12.1986.

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA DEG MAG.

Saciid Xirsi Nuux

L. 13

WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GURIYEYNTA
GOBOLKA SH. HOOSE SHALAMBOOD
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Jeylaani Maxamed uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu tahay 4.9.86 Gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Deg. Baraawe Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 52x40 kuna fadhiya 2080 MDH.

SOOHDIMI-HIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Jid

Koonfur Waxaa ka xiga: Jid

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo Laami ah

B a r i Waxaa ka xiga: Jid

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H/Guud Goboika Shabeelaha Hoose, waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) sodon maalmood oo laga bilaabo maalinta la daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo ogeysiisyada Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalambood, 18.12.1986.

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA DEG MAG.
Saciid Xirsi Nuux

L. 14

WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GURIYEYNTA
GOBOLKA SH. HOOSE SHALAMBOOD
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Caasha Maxamed Nuur uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu tahay 4.9.86 gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Deg. Afgooye Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 21x11 kuna fadhiya 231 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Jid

Koonfur Waxaa ka xiga: Baarka Shaqaalaha

Galbeed Waxaa ka xiga: Guri

B a r i Waxaa ka xiga: Jid

Qofkii daneynaaya dhulka wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H/Guud Gobolka Shabeelaha Hoose, waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) sodon maalmood oo laga bilaabo maalinta la soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo ogeysiisyada Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalambood, 18.12.1986.

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA DEG. MAG.
Saciid Xirsi Nuux

L. 15

WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GURIYEYNTA GOBOLKA SH. HOOSE SHALAMBOOD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Jeylaani Maxamed uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu tahay 4.9.86. Gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Deg. Baraawe Qaabkiisuna yahay Peligene Inregolare Addimihiisuna yihiin 20x26m.x21, 40m.x15,20mx1m kuna fadhiya 633 M.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Guri

Koonfur Waxaa ka xiga: Jid

Galbeed Waxaa ka xiga: Guri

B a r i Waxaa ka xiga: Jid

Qofkii daneynaaya dhulka wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H/Guud Gobolka Shabeelaha Hoose, waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) sodon maalmood oo laga bilaabo maalinta la soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo ogeysiisyada Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalambood, 18.12.1986.

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA DEG. MAG.
Saciid Xirsi Nuux

L. 16

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
WAAXDA MAAMULKA DHULKA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Shirkadda Somalcement uu soo qortay arji Waaxda Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 10.8.86, uu ku wey diistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Afar Gees Addimihiisuna yihiin 300x300 kuna fadhiya 90.000 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulka wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Dec. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE,
Aadan Xaashi Nuur

L. 17

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIS
QEYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Faaduma Cumar Maxamed.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeegga X/S. Lam. 172414 lagana sameeyay, Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed kuna jirto Sh.So. 30.600 kuna qoran maga caca Faaduma Cumar Maxamed, sida ku cad W. Lam. —— Tr. 3,1.87 oo ka soc baxday warqadda dacwada.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharci Lam. 2 ee Tr. 9.9.62

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Lam. 172414 ee Xisaab socota 179 lagana sameeyay Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh,So, 30.600 kuna qoran magaca J/le Faadumo Cumar Maxamed.

WAXAA LA FASAXAYAA

In Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed, uu siiyo J/le Faadumo Cumar Maxamed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 30.600 oo ah Beddelkii Jeegga kor ku xusan, mar kay ka soo wareegto muddo aan ka yareeyn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is horaag ah laga keenin.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BASAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shongole

L. 18

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIS

HADDUU ARKAY: In uu soo qortay J/le Maxamed Cabdi Maxamed.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay J/War. Lam. 732638 kuna jirto lacag dhan Sh.So, 20.000 kuna qoran magaca J/le Axmed Cabdi Maxamed sida ku cad warqadda lam. 7523 ee Tr. 7.1.87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L. 4aad

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharci Lam. 2 ee Tr. 9.9.62

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/W. Lam. 732638 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Afaraad kuna jirto lacag dhan sh.so, 20.000 kuna qoran magaca J/le Axmed Cabdi Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Afraad in ay siiso J/le Axmed Cabdi Maxamed lacagta caddadeedu tahay Sh.So, 20.000 ee ah keedkii J/Buug keydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 7.1.87,

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BASAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shongole

L. 19

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIS

MARKUU ARKAY: In uu soo qortay J/le Sahra Aadan Xuseen.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay J/War. Lam. 0428025 kuna jirto lacag dhan sh,so, 50.000 kuna qo ran magaca J/le Sahra Aadan Xuseen sida ku cad warqadda lam. 0016 ee Tr. 14,1,87 ka soo baxday Ban kiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L. War/ley.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharci Lam. 2 ee Tr. 9.9.62

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/buug Lam. 0428025 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaali yeed laanta W/dhiigley kuna jirto lacag dhan Sh,S. 50.000 kuna qoran magaca J/le Sahra Aadan Xuseen

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta W/dhiigley in ay siiso J/le Sahra Aadan Xuseen lacagta caddadeedu tahay sh,so, 50.000 ee ah keedkii J/buug key dka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 14.1.87.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BASAADIR
Gudd. Maxkamadda G/Banaadir
Dr. Cabdi Salaad Shongole

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Aweys Sheekh Cusmaan.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Lr. 615861, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 5.000, kuna qoran magaca Wasaaradda Xannaanada Xoolaha sida ku cad war. lr. 3482 ee tr. 8/4/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Laanta Labaad.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 615861 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 5.000, kuna qoran magaca Wasaaradda Xannaanada Xoolaha.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Labaad in ay siiso J/le Aweys Sheekh Cusmaan lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 5.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 22/4/87

Kaal. Maxkamadda
Maymuun Max'ud Max'ed

Gudd. Maxkamadda G/Banaadir
Dr. Cabdi Salaad Shongole

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Maxamed Cilmi Cawad.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug/Kayd Lr. 52, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 22.274,04, kuna qoran magaca J/le Maxamed Cilmi Cawad sida ku cad war. lr. 000 ee tr. 29/4/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Laanta Koowaad.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug/Kayd Lr. 52 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kowaad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 22.274,04, kuna qoran magaca J/le Maxamed Cilmi Cawad.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Kowaad in ay siiso J/le Maxamed Cilmi Cawad lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 22.274,04 oo ah beddelkii Buug/Kayd kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 3/5/87

Kaal. Maxkamadda
Maymuun Max'ud Max'ed

Gudd. Maxkamadda G/Banaadir
Dr. Cabdi Salaad Shongole

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Maxamed Saciid Axmed.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug/Kayd Lr. 27118, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 99/100"8,894.99, kuna qoran magaca J/le Maxamed Saciid Axmed sida ku cad war. lr. 002459 ee tr. 16/3/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 96 Sharciga lam. 2 ee tr. 9/9/1962kii.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug/Kayd Lr. 27118 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 99/100"8,894.99, kuna qoran magaca J/le Maxamed Saciid Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Xarunta in ay siiso J/le Maxamed Saciid Axmed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 99/100"8,894.99, oo ah beddelkii Buug/Kayd kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 21/3/87

Kaal. Maxkamadda
Maymuun Max'ud Max'ed

Gudd. Maxkamadda G/Banaadir
Dr. Cabdi Salaad Shongole

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

Uj: Baafin Jeegga Warega ee lam. 0459553

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin Jeeg lumay.

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco 5/5/87.

HADDUU ARKAY: Qod. 96 D.L. 9/9/1985kii, lumid Jegga Wareega ee kor ku xusan kuna qornayd Canbaro Axmed Cilmi kuna jirtay Sh. So. 50.000, tr. tahay 12/4/87.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeeggaas Wareega ee kor ku xusan J/le Canbaro Axmed Cilmi markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 20 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro J/le Canbaro Axmed Cilmi.

Burco, 5/5/87

Kaal. Max. G/Togdheer
Jaamac Cabdullaahi Bile

Gudd. Max. G/Togdheer
Dr. Cabdullaahi Islaw Cumar

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

MGT/14/87 Tr.25/5/87.

BAAFIN BUUG KAYD Lr. 2913/7

GUDDOOMOYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER

MARKUU ARKAY : Arjiga Tr. tahay 25/5/87 ee uu soo qortay Ibraahim Qaalib guutaale, kaasoo ku soo codsaday in loo sameeyo B/Keyd ee Lam. yahay 2913/7. oo lumay, Xanbaarsanaana Lacag dhan Sh. So. 239.125/- kuna qoran codsadaha.

MARKUU ARKAY : Qod. 59-L. D. Lumid.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo B/Kaydka Lumay ee Lr. yahay 2913/7 ee xambaarsan Lacagta Dhan Sh. So. 239.125/- ee ka lumay Jaalle Ibraahim Qaalib Guutaale.

Gacantanna laga saaro marka ay ka soo wareegto 20, casho gudahooda oo lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

Gudd. Maxkamadda G/Togdheer Burco
(Dr. Abokor Islaw Cumar)

(X-X- Sugulle)
Kaal. Maxkamadda G/Togdheer Burco

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Maxamed Nuur Xuseen.

HADDUU ARKAY: In uu lumay Buug/Kayd Lr. 478, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Laanta W/dhigley kuna qoran lacag dhan Sh. So. 2.897,54 uuna iska lahaa J/le Maxamed Nuur Xuseen, sida ku cad warqadda lamb. yahay 103 taariikhdeeduna tahay 27/3/86 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley.

HADDUU ARKAY: Qod. 96 Sharciga lam. 2 ee tr. 9/9/1965kii.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug/Kayd Lr. 478 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta W/dhiigley kuna qoran magaca J/le Maxamed Nuur Xuseen ayna ku jirto Sh. So. 2.897,54.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhigley in ay siiso J/le Maxamed Nuur Xuseen lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 2.897,54, oo ah beddelkii Buug/Kayd kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 29/8/86

Gudd. Maxkamadda G/Banaadir
Dr. Cabdi Salaad Shongole

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Ciise Cabdi Rooble.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Lr. 0460900, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000, kuna qoran magaca J/le Ciise Cabdi Rooble sida ku cad war. lr. 11497 ee tr. 24/5/87 ee soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qeybta Xis. Guud.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 0460900 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000, kuna qoran magaca Jaalle Ciise Cabdi Rooble.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Burco in ay siiso J/le Ciise Geedi Cilmi lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 30.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 24/5/87

Kaal. Maxkamadda
Maryan Cab/llahi Nuur

Gudd. Maxkamadda G/Banaadir
Dr. Cabdi Salaad Shongole

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdullaahi Jaamac Nuur

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Lr. 0435381, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000, kuna qoran magaca J/le Cabdullaahi Jaamac Nuur sida ku cad war. lr. ee tr. 24/5/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qeybta Xis. Guud.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 0435381 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000, kuna qoran magaca Jaalle Cabdullaahi Jaamac Nuur.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Koowaad in ay siiso J/le Cabdullaahi Jaamac Nuur lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 30.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 25/5/87

Kaal. Maxkamadda
Maryan Cab/llahi Nuur

Gudd. Maxkamadda G/Banaadir
Dr. Cabdi Salaad Shongole

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay J/le Xabiiba Maxamed Yuusuf.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Lr. 502966, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000, kuna qoran magaca J/le Xabiiba Maxamed Yuusuf sida ku cad war. lr. 11019 ee tr. 14/5/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qeybta Xis. Guud.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 502966 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000, kuna qoran magaca Jaalle Xabiiba Maxamed Yuusuf.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Burco in ay siiso J/le Xabiiba Maxamed Yuusuf lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 30.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 23/5/87

Kaal. Maxkamadda
Maryan Cab/llahi Nuur

Gudd. Maxkamadda G/Banaadir
Dr. Cabdi Salaad Shongole

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdi Maxamed Cali.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Lr. 0307902, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000, kuna qoran magaca J/le Cabdi Maxamed Cali sida ku cad war. lr. 11747 ee tr. 31/5/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qeybta Xis. Guud.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 0307902 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Dh/Mareeb kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000, kuna qoran magaca Jaalle Cabdi Maxamed Cali.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Dh/Mareeb in ay siiso J/le Cabdi Maxamed Cali lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 1/6/87

Kaal. Maxkamadda
Maryan Cab/llahi Nuur

Gudd. Maxkamadda G/Banaadir
Dr. Cabdi Salaad Shongole

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cismaan Ayaanle Maxamuud.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeegag/War. Lrs. 818143, 430016 iyo 430017 kuna jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000, 50.000 iyo 28.000 isugeyn (178.000) kuna qoran magaca J/le Saciid Maxamed Yaasiin sida ku cad war. lrs. 81843 iyo 11748 ee tr. 31/5/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Laanta Wardhiigley.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeegag/War. Lrs. 818143, 430016 iyo 430017 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000, 50:000 iyo 28.000, kuna qoran magaca Jaalle Saciid Maxamed Yaasiin.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Wardhiigley in ay siiso J/le Cismaan Ayaanle Maxamuud lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000, 50.000 iyo 28.000 oo ah beddelkii Jeegag/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 1/6/87

Kaal. Maxkamadda
Maryan Cab/llahi Nuur

Gudd. Maxkamadda G/Banaadir
Dr. Cabdi Salaad Shongole

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdulqaadir Maxamed Muuse.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeegag/War. Lrs. 0781552 iyo 0779346, kuna jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000 iyo (200.000) kuna qoran magaca J/le Cabdulle Cabdalla Jaamac sida ku cad war. lr. 11842 ee tr. 1/6/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qeybta Xis. Guud.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeegag/War. Lrs. 0781552 iyo 0779346 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa kuna jirto lacag dhan Sh.So. 200.000, kuna qoran magaca Jaalle Cabdulle Cabdalla Jaamac.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Hargeysa in ay siiso J/le Cabdulqaadir Maxamed Muuse lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 200.000 oo ah beddelkii Jeegag/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 1/6/87

Kaal. Maxkamadda
Maryan Cab/llahi Nuur

Gudd. Maxkamadda G/Banaadir
Dr. Cabdi Salaad Shongole

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay J/le Xaawa Ibraamih Barre.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay B/Kayd Lr. 2582, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J/le Xaawa Ibraahim Barre sida ku cad war. Ir. la'aanta ee tr. 3/6/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Laanta Wardhiigley.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) J/War, B/Kaydka Lr. 2582 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000, kuna qoran magaca Jaalle Xaawa Ibraahim Barre.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Wardhiigley in ay siiso J/le Xaawa Ibraahim Barre, lacagta cadadkeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah beddelkii B/Kayd kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 3/6/87

Gudd. Maxkamadda G/Banaadir
Dr. Cabdi Salaad Shongole

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED HARGEYSA

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Axmed Cali Miigane ku simaha Wakiilka Air Djabouti ee ku taariikhaysan 8/2/87, uuna ku codsanayo in loo cusbooneysiiyo J/Wareega ee lumay lr. 0265960 tr. 21/7/86, lacagtiisuna tahay Sh. So. 50.000

MARKUU ARKAY: Taarka Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed lamb. yahay 000154, tr. 18/2/87 ee ay ku soo caddeeyeeb in J/War. ee lumay leeyahay astaamaha ujeeddada sare ku xusan.

MARKUU ARKAY: In J/War. ee lumay lacagtiisa iska leeyahay Shirkadda Air Djabouti.

MARKUU ARKAY:

Qodobbada 69/70 ee Xeerka lam. yahay 2 ee soo baxay 9/9/65kii.

W U X U U

Go'aamiyey in la baabi'iyo J/War. ee lumay lam. 0265960 loona cusbooneysiiyo gacantana laga saaro Shirkadda Air Djabouti ama ciddii awood buuxda ka haysataya muddo 15 maalmood gudahood ah, ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA AMRAYAA

Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa in uu Nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bankiga iridihiisa si ciddii haysata J/War. ee lumay ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 22/2/87

Kaal. Maxkamadda
Xuseen Ismaaciil Axmed

Gudd. Max. G/W/Galbeed
Ibraahim Faarax Max'ed

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

MGT/82/87 Burco 4/5/1987.

BAAFIN BUUG KAYD Lr. 1492/4

GUDDOOMOYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER

MARKUU ARKAY : Dacwad ku saabsan Baafin Buugga Keydka ee Lamb. 1492/4 ee ka lumay ee uu soo codsaday Axmed Cali Cusmaan.

HADDUU ARKAY : Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed L. Burco ee Taar. 3/5/87.

HADDUU ARKAY: Qod. 69, D.L. (9-9-65) lumid Buugga Kaydka ee lumay lambarkiisuna yahay 1492/4, kuna jirtay Sh. So. 71.717, lagana sameeyey Laanta Burco, kuna qoran Axmed Cali Cusmaan.

(WUXUU GO'AAMIYEY)

In loo cusboonaysiiyo Buuggaas Jaalle Axmed Cali Cusmaan, laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waxaa laga codsanayaa Bankiga Ganacsiga Burco in Buugga Cusub ee la doonayo gacanta laga saaro Jaalle Axmed Cali Cismaan muddo aan ka badnayn 20 maalmood.

(Jaamac C/llaahi Bile)
Kaaliyaha
Max. G/Togdheer Burco

(Dr. Abuukar Islow Cumar)
Guddoomiyaha
Max. G/Togdheer Burco

SHIRKADDA "SOMALI BOTTLING COMPANY"
— HARGEYSA —

ISU YEERID SHIR GUUD

Saamileyda Shirkadda **"SOMALI BOTTLING COMPANY"** oo saldhiggeda yahay Hargeysa, waxaa la isugu yeerayaa shir caadi ah iyo mid caadi dhaaf ah maalinta 30ka Juunyo 1987, saacadduna tahay 9ka gelinka hore ee Xarunta Shirkadda sida qaraar looga gaaro arrinta kala ah:

SHIR CAADI AH:

1.Miisaaniyadda 1986.

2. Doorashada Guddiga Maamulka.

3. Wixii kaloo soo raaco.

SHIR CAADI DHAAF AH:

1. Kordhinta Rasumaalka Shirkadda.

2. Wax ka beddelid Xeerka Shirkadda.

Wixii fadhigaas hore ay ka soo qayb geli waayaan cadadka saamileyda uu sharciga dalbayo, waxaa mar labaad shir la isugu imaanayaa maalinta ay bisha tahay 8da Luulyo 1987 isla saacadda iyo Xarunta kor lagu tilmaamay.

Guddoomiyaha Ahna Maamulaha Idman
Maxamuud Axmed Maxamed "Wiliiq"

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريـــدة الرسميـــة

Sannadka 15aad Muqdisho, 20 Juun 1987 Lambar 1 R 6

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qortitaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Laougta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 10 ee 11 Juun 1987 dhismaha diiwaanka Qaranka Hawlaha Guud iyo kawa gaarahaaneed BOG, 360

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 21 ee 30 Maajo 1987, Magacaabid Nooţaayo » 370

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

QAYBTA SADDEXAAD

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.3.85, Naado Dhul Jle Maxamed Jumcaale Rooble L.145 » 371

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IWM

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.3.85, Naado Dhul J.le Maxamed Barre Cabdi L.146 » 37

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.3.85, Naado Dhul J.le Maxamed Sheekh Xasan L.147 » 37

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.3.85, Naado Dhul J.le Ismaaciil Baaruud Maxamuud L. 148 » 37

DAWLADDA HOOSE MUQ. 13.4.85, Naado Dhul J.le Maxamed Cabdi Cismaan L. 149 » 37

DAWLADDA HOOSE MUQ. 30.3.85, Naado Dhul J.le Faaduma Maxamed Cawad L. 150 » 37

DAWLADDA HOOSE MUQ. 30.3.85, Naado Dhul J.le Sheekh Maxamed Sabriye L. 151 » 37

DAWLADDA HOOSE MUQ. 30.3.85, Naado Dhul J.le Cabdiraxmaan Yaasiin Maxamed L. 152 » 378

DAWLADDA HOOSE MUQ. 4.4.85, Naado Dhul J.le Ibraahim Gacal Maxamed L. 153 » 379

DAWLADDA HOOSE MUQ. 4.4.85, Naado Dhul J.le Cabdulqaadir Cali Ciise L. 154 » 380

DAWLADDA HOOSE MUQ. 4.4.85, Naado Dhul J.le Abuukar Maxamed Xaashi L. 155 » 381

DAWLADDA HOOSE MUQ. 4.4.85, Naado Dhul J.le Maxamed Cumar Xasan L. 156 » 382

DAWLADDA HOOSE MUQ. 4.4.85, Naado Dhul J.le Maxamed Cumar Xasan Weheliye L. 157 » 383

DAWLADDA HOOSE MUQ. 1.6.85, Naado Dhul J.le Dr. Maxamed Abuukar Xaaji L. 158 » 384

DAWLADDA HOOSE MUQ. 1.6.85, Naado Dhul J.le Maxamed Saalax Cabdi L.159 » 385

AWLADDA HOOSE MUQ. 1.6.85, Naado Dhul Saalim Axmed Cumarey, Cali Maxamed Cali iyo Haasim L. 160 » 386

AXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 4.7.87, Lumid J. War. L. 0436814 ku qoran Shugri Sardheexe Xidig L. 161 » 387

AXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 1.6.87, Lumid Jeeg War. L. 0812067 ku qoran Xuseen Xasan Faarax L. 162 » 388

AXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 1.6.87, Lumid Jeeg War. L. 0435716 ku qoran Axmed Cali Axmed L. 163 » 389

AXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 1.6.87, Lumid Jeeg War. L. 0435699 ku qoran Abshiro Maxamuud Cali L. 164 » 390

AXKAMADDA GOB, BANAADIR 10,6,87, Lumid 4 J/War, ku qoran Cabdalla Saalax lax Cabdalla L, 165 » 391

AXKAMADDA GOB, BANAADIR 10,6,87, Lumid 8 Jeeg War, ku qoran Cabdalla Saalax Cabdalla L, 166 » 392

AXKAMADDA GOB, BANAADIR 10,6,87, Lumid 3 Jeeg War, ku qoran Cabdalla Saalax Cabdalla L, 167 » 393

AXKAMADDA GOB, BANAADIR, 30,5,87, Lumid B/K, L, 25070 ku qoran Xaadsan Maxamuud Cali L, 168

AXKAMADDA G. BANAADIR, 6.6.87, Lumid Jeeg War. Lam. 0437496, ku qoran magaca Furdada Xamar.

AXKAMADDA G. BANAADIR 16.6.1987, Lumid Jeeg War. L. 0848968 Cabdinaasir Maxamed Iidle

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI LAMBAR 10 ee 11 JUUN 1987 DHISMAHA DIIWAANKA QARANKA HAWLAHA GUUD IYO KUWA GAAR AHAANEED.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: oggolaashaha Gudduga joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA:

QODOBKA 1AAD

DIIWAANKA QARANKA

1) Waxaa Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guriyeynta laga abuuray diiwaanka Qaranka ee Konsoltannada, Sharikadaha iyo Qandaraaslayaasha Hawlaha Guud iyo kuwa gaar ahaaneed.

2) Diiwaangelintu waxay ku waajibeysaa cid kasta oo qabaneyso daraasadaha iyo dhismaha guud iyo kuwa Sharikadaha iyo Qandaraaslayaasha Hawlaha Guud iyo gaar ahaaneed ee laga fulinaayo Dalka gudihiisa iyadoo kuwa shisheeye loo raacayo nidaamka ku xusan faqradda b) ee Qod. 10aad iyo Qod. 20aad ee Sharcigan.

3) Hirgelinta Diiwaanka waxaa mas'uul ka ah Gudqabaneyso daraasadaha iyo dhismaha guud iyo kuwa ha Guud iyo Guriyeynta oo xubnihiisa iyo hawlihiisu ku xusan yihiin Qod. 3aad ee Sharcigan.

QODOBKA 2AAD

KA QAYB GELID TARTAN

Tartammada hawlaha guud ee Dalka waxaa ka qayb geli kara oo keliya Sharikadaha, Qandaraaslayaasha iyo Hay'adaha ku qoran Diiwaanka Qaranka, marka laga reebo hawlaha u baahan takhasuska gaarka ah oo kuwa Diiwaanka ku qoran ayan qaban karin.

QODOBKA 3AAD

radda Hawlaha Guud iyo Guriyeynta.

2) Shirarka iyo go'aanada Guddiga waxaa lagu qorayaa buugga shirarka iyadoo ay wada saxiixayaan xubnaha ka soo qayb galay shirka.

3) Buugga shirarka ma aha mid qarsoodi ah oo cid allaala ciddii dan ka leh ayaa baari karta, nuqulna weydiisan karta.

QODOBKA 4AAD

FADHIYADA IYO GO'AANADA GUDDIGA

1) Xubnaha Guddiga waxaa magacaabaya Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guriyeynta.

2) Fadhiga Guddigu wuxuu ku ansaxayaa marka ay ka soo qayb galaan ugu yaraan afar xubnood.

3) Go'aannada Guddigu waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah; haddii la noqdo barbarro waxaa aqlabiyadda leh dhinaca Guddoomiyuhu uu raaco.

4) Xubnaha Guddigu waxay yeelanayaan gunno fadhi oo lagu xaddidi doono Xeer uu soo saaro Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guriyeyntu, isagoo la tashaday Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

QODOBKA 5AAD

QAYBAHA IYO DARAJOOYINKA DIIWAANGELINTA

1) Diiwaangelintu waxay u kala baxdaa Qaybaha soo socda:

b) hawl dhismo;
t) dhismo jidad, buundooyin iyo kanaallada;
j) dhismaha dekadaha;
x) dhismaha iyo qodidda ceelasha biyaha;
kh) hawlaha korontada iyo wixii la xiriira

2) Qayb kastaa waxay u sii kala baxdaa darajooyinka soo socda marka la fiiriyo qiimaha qandaraaska:

b) qiimaha u dhexeeya Shs. 500.000 — Shs. 2.000.000
t) qiimaha u dhexeeya Shs. 2.000.001 — Shs. 5.000.000
j) qiimaha u dhexeeya Shs. 5.000.001 — Shs. 10.000.000
x) qiimaha u dhexeeya Shs. 10.000.001 — Shs. 30.000.000
kh) qiimaha ka badan Shs. 30.000.000

QODOBKA 6AAD

1) La diiwaangeliyaha waxaa lagu diiwaangelinayaa qaybaha iyo darajooyinka Guddigu u garto inuu ku habboon yahay

2) La diiwaangeliyaha waxaa lagu diiwaangelinayaa qayb kasta saddex darajo oo keliya, iyada oo isla markaana lagama maarmaan ay tahay in darajooyinkaas ay yihiin kuwo isku dhow.

QODOBKA 7AAD
CODSIGA DIIWAANGELINTA

1) Si diiwaanka loogu qoro, La-diiwaangeliyuhu wuxuu Guddiga u soo gudbinayaa codsi iyo warbixin ay ku tifaftiran yihiin Shuruudaha Sharciga tilmaamayo.

2) La-diiwaangeliyuhu waa in uu ku soo codsadaa qoraal gaar ah qayb kastaa asagoo caddeynaya darajada ama darajooyinka uu daneynaayo in lagu diiwaangeliyo.

3) Guddigu wuxuu weydiin karaa faahfaahin, sharaxaad, iyo qoraalladii kale ee uu u baahdo wuxuuna sameyn karaa hubin iyo baaris asagoo u xilsaaraya xubin ka mid ah Guddiga ama Hawlwadeen ka tirsan Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guriyeynta.

4) Guddigu waa inuu si degdeg ah go'aan uga gaaraa codsi kasta waana in la gaarsiiyaa codsadaha iyada oo loo sheegayo sababta go'aankaas.

QODOBKA 8AAD
ISBEDDELKA DIIWAANGELINTA

1) La-diiwaangeliyuhu wuxuu awood u leeyahay oo keliya inuu qabto hawlaha qaybahooda iyo darajooyinkooda uu ku diiwaangashan yahay. Marka la-diiwaangeliyuhu tartan ka qayb galo wuxuu soo gudbinayaa qoraallada diiwaangelinta oo waqtigoodu ka horreeyey hal bil.

2) La-diiwaangeliyuhu hadduu u qalmo waxaa loo oggolaan karaa, sanad kadib, darajooyinka kale ayada oo la raacayo faqradda labaad ee Qod. 6aad ee Sharcigan.

3) Haddii la-diiwaangeliyuhu u qalmi waayo ama ka bixi waayo darajada lagu diiwaangeliyey, Guddigu wu-

QODOBKA 9AAD
GAARSIIN QORAAL

Wax allaala wixii qoraal ah oo la gaarsiinayo la-diiwaangeliyaha oo ku saabsan fulinta qodobbada Sharcigan waxaa lagu gaarsiinayaa degaankiisa uu ku tilmaamay Muqdisno ama cinwaanka ugu qoran codsigiisa, haddii labada laga waayo, qoraallada waxaa loo dhigayaa Xoghaynta Guddiga.

QODOBKA 10AAD
SHURUUDAHA DIIWAANGELINTA

A) Shuruudaha Diiwaangelintu waa sida soo socota:

1) Waa in la-diiwaangeliyuhu yahay Soomaali;

2) Waa in la-diiwaangeliyuhu keenaa warqadda dembi la'aanta;

3) Waa in la-diiwaangeliyuhu caddeeyaa waayo-aragnimadiisa farsamo ee uu ku muujinaayo shahaaddooyin tacliineed iyo qoraallo la xiriira hawlo uu horay u qabtay, cidda uu u qabtay iyo qiimaha hawlahaas, isagoo muujinaaya qoraallo uu ka sito ciddii uu u fuliyey hawshaas;

4) Waa in la-diiwaangeliyuhu soo caddeeyaa awoodiisa dhaqaale, guurto, maguurto iyo macaamiilkiisa bankiga, iyadoo Guddiga Diiwaangelintu si toos ah u baari karo qoraalladaas;

5) Waa in la-diiwaangeliyuhu soo caddeeyaa qalabka iyo alaabta farsamo ee uu hawsha ku qabanayo, isagoo ku soo lifaaqaya codsiga diiwaangelinta;

6) Waa in la-diiwaangeliyuhu soo caddeeyaa darajada uu rabo in lagu diiwaangeliyo;

7) Waa in la-diiwaangeliyuhu soo caddeeyaa haddii uu horey u diiwaangashanaa;

8) Waa in la-diiwaangeliyuhu soo caddeeyaa inaan canshuurta Dawladda lagu lahayn;

9) Waa in la-diiwaangeliyuhu soo caddeeyaa cinwaankiisa.

B) Soo caddeynta Soomaalinimada oo ku xusan fag

i) Mashaariicda dibadda laga maalgeliyo;

ii) Mashaariicda u baahan aqoon gaar ahaaneed ee kuwa Dalka ka diiwaangashan ayan qaban karin oo Dawladdu u oggolaatay Konsoltannada, Sharikadaha ama Qanddaraalayaasha ajnabiga ah.

QODOBKA 11AAD
AWOODDA WASIIRKA

1) Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guriyeyntu, kaddib marka uu dhegeysto Guddiga Diiwaangelinat, waxaa uu soo saari karaa Xeer Wasiir oo uu ku qeexaayo tirada iyo aqoonta Shaqaalaha farsamo, tirada iyo tayada qalabka la diiwaangeliyaha looga baahan yahay qayb kasta iyo darajo kasta oo lagu diiwaangelinaayo.

2) Sidoo kale Wasiirku wuxuu soo saari karaa Xeerhoosaad uu Guddiga Diiwaangelintu ku fulinaayo xilkiisa.

Qodobka 12aad
Caddeynta la-diiwaangeliyaha

1, La Diiwaangeliyeyaasha shakhsi ah shuruudaha ku xusan faqradda 1aad iyo 2aad ee qod, 10aad iyaga ayaa laga rabaa Sharikadaha Saamileeyda ah waxaa laga rabaa shuruudahaas maamulayaasha ama maamulaha keliya ee idman kuwa shisheeyaha ahna waxaa laga rabaa shuruudahaas maamulaha wakiilka u ah sharikadda, sharikadaha kale waxaa laga doonayaa shuruudaha xubnaha oo dhan,

2, Shuruudahaas loogama baahno Hay,adaha Qarankа

Qodobka 13aad
Galka Diiiingelinta

1, La Diiwaangeliye kasta waxa uu leeyahay gal u aar ah oo loogu haayo codsigiisa diiwaangelinta, wixii falal ah oo la xiriira arrintaas iyo qoraalada ku xusan faqrada ha soo socda:

2, Maamule kasta oo loo qabta hawsha qandaraaska ee sharcigan ku xusan waa inuu u soo diraa Xoghayaha guud

la xiriira Qod, 10aad iyo Qod, 11aad ee Sharcigan,

Qodobka 14aad
Sababaha laali kara Diiwaangelinta

a) Waxaa Diiwaangelinta laali kara sababaha soo socda:

1, Oggolaansho heshiis looga hortagaayo caddeyn kicid,

2, Xukun Maxkamadeed oo aan kama dambeys ahayn oo la xiriira diidmo ku qorid diiwaanka si waafaqsan qod, saad ee Sharcigan,

3, Marka la hubiyo in ay jirto dadaal xumo ama fulin la'aan ama kala go' ku dhacda fulinta hawlaha qandaraaska lagu qaatay,

4, In la jebiyey shuruudaha u degsan maalgelinta shisheeye iyo maamul xumo culus ee ku saabsan shuruudaha Nabadgelyada iyo daryeelka Shaqaalaha,

5, Fulin la'aan waajibaadka ku xusan faqradda 3aad ee qod, 13aad ee Sharcigan,

b) Laalidda diiwaangelinta ee ku xusan lambarka 4aad iyo lambarka 5aad waa inaysan ka yaraan laba bilood kana badnaan hal sano.

Qodobka 15aad
Sababaha ka tirtirjidda diiwaanka

Waxaa Diiwaanka la isaga tirtirj karaa sababaha soo socda:

1, ku dhawaaqid kicid,

2, Xukun Maxkamadeed kama dambeys ah oo la xirii ra diidmo ku qorid Diiwaanka oo waafaqsan qod, 8aad ee Sharcigan,

3, Marka la hubiyo in ay jirto khayaano, dadaal xumo iyo gefaf culus oo la xiriira fulinta hawlaha qandaraaska lagu qaatay,

, Ka waantoobi la'aanta dembiyada ku xusan Lam, 3, 4 iyo 5 ee qodobka hore,

5, Ka soo bixid la'aanta shuruudihii saldhigga u ahaa Diiwaangelinta ama haddii la hubiyo in diiwaangelinta lagu helay been abuur,

1, Marka laga reebo arrimaha ku xusan faqradaha laad ee labaad qodob ee hore laalidda iyo ka tirtirida diiw aanka waxaa ku dhawaaqaya Guddiga, kaddib marka uu hubiyo runta qoraalada, waana inay si qoraal ah ugu gudbi yaan la diiwaangeliyaha,

2, Guddigu intuusan ku dhawaaqin go'aanka hore, Waa inuu u gudbiyaa la- diiwaangeliyana qoraallada la xi riira saboaana laalidda ama ka tirtirida, La Diiwaangeliyu hu waa inuu ku keeno jawaabidiisa muddo 15 maalmood gu dahooda ah, muddadaas kaddib guddigu wuxuu soo saari ka raa go'aankiisa,

3, La Diiwaangeliyeyaasha laga tirtiro diiwaanka cod si cusub ma keensan karaan muddo Saddex Sano ah,

Qodobka 17aad

Kharajka Diiwaangelinta

La Diiwaangeliyuhu wuxuu bixinayaa sannad kasta kha rajka diiwaangelinta oo ah sida soo socota,

b) sh.so, 10,000/= heerka sh,so, 500,000 ilaash,so 2,000,000,

t) sh,so, 20,000/ heerka shs, 2,000,001 ilaa sh,so 10,000,000

j) sh,so, 50,000/ heerka sh,so, 10,000,001 iyo Wxiij ka badan

x) sh,so, 100,000/ Shariikadaha Ajnabiga ah,

Qodobka 18aad

BixintaKharajka Diiwaangelinta

1, La Diiwaangeliye kasta waa inuu u keenaa guddiga Diiwaangelinta caddeyn inuu bixiyey kharajka diiwaange linta Sannadka soo socda intaan bisha sannadka ugu horey sa dhammaanin,

2, La diiwaangeliye kasta waxaa la siinayaa caddeyn soconeysa hal sano oo uu bixiyey kharajka diiwaangelinta

ee ku tilmaaman Qod. 17aad ee sharcigan.

3. La diiwaangeliyaha bixin waaya kharajka ku xusan Qod. 17aad waxaa laga laalayaa ku qornaashada diiwaanka.

Qod. 19

Khasiraad

1. Guddiga Diiwaangelintu waxay awood u leeyihiin in ay ku khasiraan lacag dhan Sh.So. 100.000/= ilaa Sh.So 500.000/= cid kasta oo ku xadgudubta Qodobada Sharcigan dhigaayo, haddii xadgudubkaasi uusan keeneynin ka laalid, ka tirtirid diiwaanka ama dembi Maxkamad ku shaqo leedahay.

2. Qofkii Guddiga Diiwaangelintu khasiro wuxuu cabasho u qoran karaa muddo 15 maalmood gudahood, laga billaabo taariikhda go'aanka khasiraadda gacanta laga saaro, Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guriyeynta oo yeelanayo go'aanka kama dambeysta ah.

Qandaraaslayaasha iyo Konsaltannada qalaad

Qod. 20

1. Qandaraaslayaasha iyo Konsoltanada, qalaad ee la dii waangeliyo waxaa loo sameynayaa diiwaangelin meel ku gaar ah oo caddeyneysa muddada uu dalka joogaayo iyo wixii kale oo caddeyn ah.

2. Diiwaanka waa laga tirtirayaa markii muddada la diiwaangeliyey dhammaato, haddii aan la helin sabab waqtiga loogu kordhiyo.

Qod. 21

Qiimeeynta tartammada

Iyadoo mar waliba la raacayo shuruucda tilmaamaya habka bixinta qandaraasyada Hawlaha Guud, waxaa Wasaaraddda iyo Wakiiladeeda Gobollada yeelanayaan awoodda qiimeynta tartammada sharcigan ku xusan haddii Hey'ad kale aysan laheyn sharci ahaan awooddaas.

Qod. 22
Baabi'in

Waxaa la baabi'iyey Sharciga 71 ee 22 Nofember 1970 «Diiwaanka Qaranka ee Qandaraaslayaasha» iyo sharci kasta oo ka hor imaanaaya ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 23
Dhaqan gelid

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 11 Jun 1987

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 21 ee 30 Maajo 1987 Magacaabid Nootaayo

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Dastuurka JDS, Qodobkiisa 82aad.

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lr. 8 ee 15.2.61 iyo Lr. 1 ee 2.3.62 oo ku wada saabsan habeynta hawlaha Nootaayada.

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lr. 7 ee 2.2.86 ee ku saabsan Mihnadda Nootaayada.

ISAGOO TIXGELINAYA : Talada uu soo jeediyey Wasiirka Garsoorka iyo A. Diinta.

XEERKA soo socda :

Qod. 1aad

Ayadoo la tixgelinayo Qodobka 2aad ee Sharci Lr. 7 ee soo baxay 2.2.1986 laga bilaabo taariikhda uu dhaqan galo Xeerkan Jaallaha magaciisa hoos ku qoran waxaa lagu magacaabayaa Nootaayo:

Dr. Cabdi Colaad Xiireey. (Muqdisho)

Qodobka 2aad

Xeeka wuxuu dhaqan galayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waan aragnay ee diiwaangelinay,
Diiwaanka L. 4 bog L. 42,
Muqdisho 1 Jun 1987
Hanbidhowraha Guud,
Dr. Xuseen Cabdulle Cali,

Muqdisho 30 Maajo 1987

MADAXWEYNAHA JDS

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maxamed Jumcaale Rooble uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu aheyd 2.6.80 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wardhigley Waddada ———— qaabkiisu yahay Trabesiyo addimihiisuna yihiin (18+13) yaal Muqdisho Degmada Wardhigleey ———— ×21. ————, kuna fadhiya mq. 325,50.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Maxamed Barre

Koofur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Axmed Cali

Bari waxaa ka xiga Maxamuud Cali Ciid

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 12 Marso 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
(J.le Maxamuud Cabdi Cismaan)

L.145

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maxamed Barre Cabdi uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu aheyd 20.8.72 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wardhiigleey Wadada Bur-hindi qaabkiisu yahay Rettangolar addimihiisuna yihiin 21X12 kuna fadhiya mq. 252.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Xaashi Sahal

Foofur waxaa ka xiga : Jid

Galbeed waxaa ka xiga : Maxamuud Xuseen

Bari waxaa ka xiga : Cashkira Weheliye

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah .

Muqdisho 12 Maarso 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
(J.le Maxamuud Cabdi Cismaan)

L.146

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maxamed Sheekh Xasan uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalinta taariikhdu aheyd 3.2.85 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Wadada ———— qaabkiisu yahay Retangolar addimihiisuna yihiin 50 × 100 kuna fadhiya mq. 5000

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : GL.16/85

Koofur waxaa ka xiga : Wado

Galbeed waxaa ka xiga : GL.17/85

Bari waxaa ka xiga : Dhul dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalin lagu soo qoro qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 12 Maarso 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/ DHULKA EE D/ HOOSE
(J.le Maxamuud Cabdi Cismaan

L.147

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Ismaaciil Baaruud Maxamuud uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose Muqdisho, maalintii taariikhdu aheyd 23.1.85 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Wadada ———— qaabkiisu yahay Afar Gees Isl addimihiisuna yihiin 20 × 20 kuna fadhiya mq. 400

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 2001

Koofur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 2000

Bari waxaa ka xiga Dhul Lab. 2004

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 12 Maarso 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/ DHULKA EE D/ HOOSE

(J.le Maxamuud Cabdi Cismaan

L.148

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maxamed Cabdi Cismaan uu soo qoray arji waaxda Dhulka Rasmiga an ee Dawlaqaa hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu aheyd 4.2.85 uu ku weyiistay gabal dhul Dawlaqeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Xamar Jeb-jeb Wadada V. Rooma qaabkiisu yahay Rectagno addimihiisuna yihiin 15,90 × 9,30 kuna fadhiya mq. 147,87.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Guri Dad

Foofur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Guri Dad

Bari waxaa ka xiga Guri Dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo yaal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (3) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 13 APR. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/ DHULKA EE D/ HOOSE
(J.le Maxamuud Cabdi Cismaan

L.149

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Faaduma Maxamed Cawad ay soo qoratay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu aheyd 13.2.85 ay ku weydiisatay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Shibis Wadada ———————— qaabkiisu yahay Afar Gees Isl. addimihiisuna yihiin 12 × 12, kuna fadhiya mq 144.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koofur waxaa ka xiga : Faaduma Maxamed

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

Bari waxaa ka xiga : Guri Dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 30 MAR 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE

(J.le Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 150

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Sheekh Maxamuud Sabriye uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu aheyd 18.4.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Wadada ———————— qaakiisu yahay Afar Gees addimihiisuna yihiin 24 × 24 kuna fadhiya mq. 576.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koofur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

Bari waxaa ka xiga Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 30 MAR 1985

L.151

AGAASIMAHA WAAXDA M/ DHULKA EE D/ HOOSE

(J.le Maxamuud Cabdi Cismaan)

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

N A A D O D H U L

Waxaa laca**dd**eynayaa in J.le Cabdu**r**axmaan Yaasiin Maxamuud uu soo qo**r**tay a**r**ji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Da**w**ladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taa**r**iikhdu aheyd 5.2.85 uu ku we**y**diista**y** gaba**l** dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Wadada ———— qaabkiisu yahay Re**tt**ongolare addimihiisuna yihiin 20×40 kuna fadhiya mq. 800.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Guri dad

Koofur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

Bari waxaa ka xiga Guri dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka ootaal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 30 MAR 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
(J.le Maxamuud Cabdi Cismaan)

L.152

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Ibraahim Gacal Maxamed uu soo qortay arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu aheyd 15.3.85 uu ku soo weydiistay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Wardhigleey qaabkiisu yahay Trabesiyo addimihiisuna yihiin $16+22\times30$ kuna fadhiya mq. 570.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Foofur waxaa ka xiga : Beerta Dawladda Hoose

Galbeed waxaa ka xiga : Maxamed D Dodii

Bari waxaa ka xiga : Dhagane Axmed

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bilaabo maalintii lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L.153

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.ie Cabdulqaadir Cali Ciid uu soo qortay arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu aheyd 29.1.85 uu ku soo weydiistay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Wardhigleey qaabkiisu yahay ELLE addimihiisuna yihiin (8(8+23) + (6.5×18,5) kuna fadhiya mq. 304,25.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koofur waxaa ka xiga : Guri dad

Galbeed waxaa ka xiga : Guri dad

Bari waxaa ka xiga : Dhulkiisii hore

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bilaabo maalintii lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 4 APR 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
(J.le Maxamuud Cabdi Cismaan)

L.154

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Abuukar Maxamed Xaashi iyo14 qof ay u soo qorteen Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu aheyd 1.1.85 ay ku soo weydiisteen gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir qaabkiisuna yahay Afar Gees Isl. addimihiisuna yihiin 200 × 200 kuna fadhiya mq. 40.000.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Dowladeed

Koofur waxaa ka xiga : Jid

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Dowladeed

Bari waxaa ka xiga : Dhul Dowladeed

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bilaabo maalintii lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 4 APR 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L.155

DOWLADDA HOOSE EE XAMAR

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cumar Xasan Weheliye uu soo qortay Arji una soo qortay Waaxda dhulka rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 26.3.1985 ku soo weydiistay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir qaabkiisu yahay Retangolar adimihiisuna yihiin 40X15 kuna fadhiya 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul dad

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dad

B A R I: waxaa ka xiga Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D. Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 4 Abriil 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

LR. 157

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cumar Xasan Weheliye uu soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Dhulka Rasmiga ah ee Dowladda Hoose ee Muqdiistay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degdisho maalinta taariikhdu ahayd 23.3.1985 uu ku soo weymada Wardhiigleey Qaabkiisu yahay Poligonaale adimiihiisuna yihiin (20×14) + (2,5×5) + (66×5) kuna fadhiya mq. 335

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO

Koonfur waxaa ka xiga: SUUQA SIINAY

Galbeed waxaa ka xiga: MASAAJID RAXMA

B A R I waxaa ka xiga: CALI ILIK BEYLE

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D. Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 1 Juun 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE

JEOM. MAXAMUUD CABDI CISMAAN

L. 156

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Dr. Maxamed Abuukar Xaaji uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 28.5.1985 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada H. Wadaag. wadada qaabkiisu yahay Trabesiyo adimjhiisuna yihiin Mr. 690+70+60, kuna fadhiya mq 820.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Guri dad

B A R I: waxaa ka xiga Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D. Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 4 Abriil 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
JEOM. MAXAMUUD CABDI CISMAAN

LR. 159

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Saalax Cabdi uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 13.10.1984 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Hodan waddada

caabkiisu yahay Rett. addimihiisuna yihiin Mt. 13,50X13,50 kuna fadhiya mq. 182,2.5/=

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid cad

Koonfur waxaa ka xiga Guri dad

Galbeed waxaa ka xiga Jid cadde

B A R I waxaa ka xiga: Guri dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D. Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 1 Juun 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE

JEOM. MAXAMUUD CABDI CISMAAN

LR. 161

DOWLADDA HOOSE EE XAMAR

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Saalim Axmed Cumarey, Cali Maxamed Cali iyo Haashim Cabdulqaadir Maxamed ay u soo qorteen arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 17.4.1985 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan waddada Bender Qaasim qaabkiisu yahay Quadrato addimihiisuna yihiin Mt. 24X24 kuna fadhiya mq. 576.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 1981. r.9.82

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B A R I waxaa ka xig aWaddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D. Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 4 Abriil 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
JEOM. MAXAMUUD CABDI CISMAAN

LR. 160

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

G U D O O M I Y A H A

HADDUU ARKAY: Arji uu soo qortay Jaalle Shukri Sardheexe Xidig

HADDUU TIXGALIYAY: In uu dhumay J/wareega Lam. 0436814, kuna jirto lacag dhan Sh. So. 22.000=/ kuna qoran magaca Furdada Xamar, laga sameeyay Laanta Koowaad ee Bangiga ganacsiga iyo kaydka Soomaaliyeed sidda ku cad warqadda lam. —————— Taar. 3.6.1987 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad.

WUXUU XEERIYAY

